



PDRC
PUNTLAND DEVELOPMENT
RESEARCH CENTER



SOMALI
DIALOGUE
PLATFORM

DIMUQRADDIYEYNTA PUNTLAND: AMBA-QAADIS



QORAAL-SIYAASADEED

May 2022

Dimuqraaddiyeynta Puntland: Amba-qaadis

Hordhac

Madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni waxa uu xilka madaxweyne-nimo ee Puntland la wareegay sanadkii 2019-kii, isaga oo ballanqaaday inuu dib u soo nooleyn doono, isla markaana dhameystiri doono hannaanka dimuqraaddiyeynta dawladda Puntland. Madaxweynuhu, ka dib markii uu u kuur-galay caqabadihii ay la kulmeen maamulladii ka horreeyey, waxa uu isla markiiba muujiyey sida ay uga go'an tahay taabba-gelinta hannaanka, isaga oo dhisay Guddiga (3-aad ee) Ku-meel-gaarka ah ee Doorashooyinka Puntland (TPEC). Intaa wixii ka dambeeyay, guddigu waxa uu majaraha u qabtay fulinta doorashooyinka hordhaca ah ee golayaasha degaanka ee ku salaysan nidaam hal-qof-hal cod (OPOV). Doorashooyinka hordhaca ah ee ka dhacay saddexda degmo ee Qardho, Uffeyn iyo Eyl waxa ay u qabsooneen si habsami leh 25kii Oktoobar 2021, taas oo muujinaya guul weyn oo Puntland u soo hoyatay dhanka u-gudubka nidaam dimuqraaddi ah.

Ujeedka ugu horreeya waxa uu ahaa in guushan lagu dabbao doorashooyinka golayaasha degaanka ee dhamaan degmooyinka Puntland, oo sidaa loogu gudbo doorashada OPOV ee golaha shacabka iyo xilka madaxweyne-nimo ee Puntland. Hakad ayaa galay hannaanka horraadkii sanadkii 2022, hase yeeshay arrimo badan oo kala duwan ayaa soo bixi kara marxaladaha soo socda, kuwaas oo u baahan doona in wax laga qabto haddii la doonayo in aan la sii lumin kalsoonida dadku ka qabo qorshaha dimuqraadiyeynta.

Dulucda sare ku xusan ee qoraalkan kooban ee siyaasadda waxa lagu baadi-goobaya in lagu lafo-guro horumarka iyo caqabadaha la xiriira hannaanka dimuqraadiyaynta Puntland, sidaa darteedna daneeyayaasha Soomaaliya iyo kuwa caalamiga laga taageero dardargelinta gaaritaanka doorashooyin nabad ah oo lagu kalsoonan karo. Qoraal-siyaasadeedkan waxa uu salka ku hayaa xog laga soo ururiyey dood-kooxeedyo, waraysiyo gaar-gaar ah oo lala yeeshay dad xog-ogaal ah, iyo dodo ka dhacay Madasha Daneeyayaasha Dimuqraadiyaynta Puntland 20-kii Febraayo 2020. Hordhaca ka dib, qoraal-siyaasadeedku waxa uu u qoran yahay sida soo socota. Marka hore, waxa dulmar lagu sameynayaa TPEC III iyo doorashooyinkii hordhaca ahaa ee lagu guulaystay. Marka xigta, warbixintu waxay falanqeynaysaa caqabadaha waaweyn ee lala kulmay doorashooyinka ka dib, ka hor inta aan loo gudbin sahminta caqabadaha muddada fog ee la xiriira guud ahaan hannaanka dimuqraaddiyeynta. Ugu dambayn, qoraal-siyaasadeedku waxa uu soo jeedinaya talooyin.

TPEC III iyo Doorashooyinka Hordhaca ah ee Lagu Guuleystay

Markii la asaasay Nofembar 2019, TPEC III waxay isla markiiba bilawday hannanka dib-u-nooleynnta dimuqraaddiyaynta, iyada oo la kaashanaysa ururrada bulshada rayidka ah (CSOs), odayaasha, dhallinyarada, haweenka iyo siyaasiyiinta. Tallaaboooyinka xigey waxa ay ahaayeen dejinta qorshe fog, dhamaystirka qaab-dhismeedka sharci, kobcinta awoodda waxqabad ee TPEC iyo, bishii Diseembar 2019, daabacaadda tilmaamayaasha diiwaangelinta ururrada siyaasadda (guidelines for registering political associations). Wixii loo gaaray bishii Agosto ee 2020, guddigu waxa uu soo hoyey guul kale oo muhiim ah, isaga oo dhameystiray diiwaan-gelinta, kala-saarista (shaandheynta) iyo aqoonsiga ururrada siyaasadda; isaga oo iclaamiyey saddexda degmo ee ay dorashada hordhaca ahi ka dhacayso (Eyl, Uffeyn iyo Qardho), isla markaana bilaabay ololayaal waxbarasho oo lagu beegsanayo bulshada guud ahaan iyo gaar ahaan codbixiyayaasha. Hawlahan waxa ay gundhig u noqdeen in diwaan-galinta codbixiyayaashu bilaabato bartamaha 2021, iyada oo la adeegsanayo qaab casri ah, isla markaana aan kharash badan ku baxayn, hawshaas oo dhammaatay Sebtembar 2021. Intaa waxa dheer, guddigu waxa uu dhameystiray qaybinta kaararka cod-bixiyayaasha ee saddexda degmo, isla

markaana soo saaray liiska kama dambeysta ah ee musharrixiinta matalayey ururrada siyaasadda. Guddigu waxa kale oo uu saddexda degmo doodo ugu qabtay ururrada siyaasadda, isla markaana dadka la wadaagay jadwalkooda ololaha doorashada ee 26 September – 24 October 2021 ee doorashada ka hor.

Hawshan adag ayaa dhabbaha u xaartay in si guul ah ay u hirgalan doorashooyinkii dhacay 25kii Oktoobar 2021, iyada oo kumanaan reer Puntland ah oo ku kala nool Eyl, Uffeyn iyo Qardho ay si nabad ah codkooda u dhiibteen. Inta badan codbixiyayaasha waxay u ahayd fursaddii ugu horreysay ee ay ku doortaan cidda wakiilka uga noqonaysa siyaasadda. Doorashadu waxay caddeyn u ahayd in doorasho OPOV ay ka dhici karto dalka Soomaaliya, waxayna siiyeyen muwaadiniinta, ururrada siyaasadda, TPEC III iyo dawladda fursad ay wax ka bartaan, si ay ugu darsadaan talada ka hor inta aan degmooyinka haray laga qaban wareegga xiga ee doorashooyinka - oo markii hore la filayay inay dhacaan Disembar 2022. Marka la eego hannaanka, waxa la diiwaan-gashay 46,839 codbixiye, in kasta oo 9,262 oo ka mid ah aanay qaadan kaararka, halka 8,724 ayan codayn. Wadar ahaan, dad lagu qiyasay 28,854 ayaa codkooda dhiibtay.

Si dhab ah marka loo eego, natijadu waxay muujineysaa in tartan loo galay doorashooyinka, iyada oo uusan jirin urur siyaasadeed keligiis ku guulaystay aqlabiyyadda hal degmo - in kasta oo saddex urur ay aad uga muuqdeen natijada:

- Kaah waxa uu ku guuleystay 35 kursi (13 Eyl ah, 12 Qardho ah iyo 10 Uffeyn ah).
- Mideeye waxa uu ku guuleystay 25 kursi (6 Eyl ah, 11 Qardho ah iyo 8 Uffeyn ah).
- Caddaalad iyo Sinnaan waxa uu ku guuleystay 20 kursi (4 Eyl ah, 9 Qardho ah iyo 7 Uffeyn ah).
- Horseed waxa uu ku guuleystay 3 kursi (2 Eyl ah iyo 1 Uffeyn ah).
- Run iyo Caddaalad waxa uu ku guuleystay 2 kursi (labadaba Eyl)
- Ifiye waxa uu ku guuleystay 1 kursi (Ufeyn).

Sida ay ku warbixiyeen ka qayb-galayaasha wareysiyada, dadku si xooggan ayay u taageereen hannaanka, taas oo ay sabab u tahay baahida loo qabo in laga gudbo nidaamka soo jireenka ah ee awood qaybsiga ku dhisan habka qabiilka - oo awooddu ay gacanta ugu jirtay dad kooban – loona gudbo nidaam ay muwaadiniintu ku dhaqmi karaan xuquuqdooda dimuqraaddi, iyo weliba in la wanaajiyo isla-xisaabtanka iyo daah-furnaanta. Dhammaystirka hannaanku waxa kale oo uu dhiirigelin wanaagsan u ahaa guud ahaan Soomaaliya dhanka taabba-gelinta maamul dimuqraaddi ah, iyada oo ka-qaybgalayaal badan ay tilmaameen Puntland inay hormuud u tahay dawladnimada Soomaaliya, markii horena nidaamka federaalka, haddana hannaanka dimuqraaddiyeynta.

Caqabadaha Waaweyn Doorashada ka Dib

In kasta oo dadweynuhu taageero weyn u hayeen, haddana hannaanka dimuqraadiyayntu waxa uu lumiyey xawligii uu ku socday caqabado dhawr ah awgood, ayna ka mid yihiin, dib-u-dhac ku yimid fadhibii golayaasha la soo doortay; colaad ka aloosantay Boosaaso bishii Disembar 2021; Is-casilaaddii hoggaanka TPEC; iyo doorashooyinkii heer federaal ee dhawaan la soo gaba-gebeeyey oo si mug leh u mashquuliyey maamulka (Puntland). Caqabadahan waa in si buuxda loo wajaho haddii la doonayo in dib loo dardargeliyo, lana dhameystiro doorashooyinka degaanka.

Dib-u-dhaca Fadhiisinta Golayaasha La Doortay

Qodobka 43-aad ee Xeerka Dawladaha Hoose ee Puntland waxa uu dhigayaa in dawladdu muddo 30 maalmood ah ku fadhiisiso xildhibaannada la soo doortay. In kasta oo urur-siyaasadeedka dawladda (KAAH) uu ku guulaystay tirada kuraasta ugu badan ee saddexda degmo, haddana ururrada siyaasadda ee galay kaalmaha labaad iyo saddexaad — Caddaalad iyo Sinaan iyo Mideeye, ayaa isla markiiba samaystay is-bahaysi ay ku doonayaan inay helaan maayarada (Mayors) degmooyinka Uffeyn iyo Qardho. Arrimo badan oo soo baxay darteed, dawladdu way ka gaabisay inay hannaanka horey u sii waddo. Arrintan waxa ay sababtay in fadhigii golayaasha degaanka – iyo doorashada maayarada - uu ku yimaado dib-u-dhac shan bilood ah, taas oo waxyeello u geysatay kalsoonida dadku ku qabay hannaanka.

Ka dib marka uu cadaadis badan uga yimid Ururrada Bulshada Rayidka ah, Ururrada Siyaasadda iyo Shacabka, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeeyntu waxa ay soo saartay jadwalka dhismaha golayaasha degaanka ee Eyl, Uffeyn iyo Qardho (Doorashada iyo dhaarinta guddoomiyayaasha). 6-dii April 2022, Uffeyn waxay noqotay golihii degaanka ugu horeeyay ee la dhaariyo, isla markaana doorta guddoomiye iyo ku-xigeen: Ururka Caddaalad iyo Sinnaan waxa uu ku guuleystay Duqa, ugana adkaaday KAAL hal cod, halka Mideeye uu ku guuleystay Guddoomiye ku xigeen. Marka la eego magaalada Qardho, isla is-bahaysiga ayaa muujiyay awood, oo wadar dhan 20 xildhibaan ay Mideeye ugu codeeyeen Duqa magaalada, Caddaalad iyo Sinaan-na ku-xigeen. Fadhiisinta golaha degaanka degmada Eyl ayaa lagu waday inuu qabsoomo 14-ka bisha April, iyada oo ururka KAAH oo kaliya u tartamayey xilka Duqa, balse urur siyaasadeedku waxa uu oggolaaday in labo ka mid ah xubnihiisu ay u tartamaan jagadaas, taas oo kala dhantaashay isku-duubnidii bulshada degaanka, iyo in dabley ay la wareegto goobta doorashada. Illaa wakhtiga la soo saaray qoraal-siyaasadeedkan, khilaafka xal lagama gaarin, welina ma dhicin munaasabadda doorashada iyo dhaarinta. Waxa lagama maarmaan ah in hawshan la dhamaystiro si si buuxda dib loogu soo cesho kalsoonida dadku ku qabo hannaanka.

Colaadda Boosaaso

Xil ka qaadista iyo beddelkii uu Madaxweyne Deni ku sameeyay Taliyihii Ciidanka PSF, Maxamuud Cismaan Cabdullaahi ‘Diyaano’ bishii Disembar 2021, waxa uu sababay iska horimaad ka dhacay Boosaaso, oo aan kaliya ka mashquulin dawladda uu hoggaanka u hayo madaxweyne Deni inay horey u socodsiiso hannaanka dimoqraadiyaynta, balse sidoo kale sii adkeysay doorashada xubnaha Aqalka Hoose ee Boosaaso ee Dawladda Federaalka Soomaaliya (FGS). 4-tii Maars 2022, madaxweynuhu waxa uu heshiis la gaaray isimo ka socday Boosaaso iyo Maxamuud ‘Diyaano,’ oo loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Komandoska Puntland, iyada oo sarkaalkii horey loogu beddelay, Amiin Cabdullaahi, loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Gaarka ah ee Sirdoonka Puntland. Heshiiskan waxa uu sahlay in 5-tii Maars 2022 la soo doorto 16-ka xubnood ee ka qaybgalaya baarlamaanka federaalka Soomaaliya. Iyada oo sidaa tahay, haddana khilaafku waxa uu tilmaamayaa muranka la xiriira arrimaha siyaasadda Puntland, kana bilowday Boosaaso. Haddii khilaafyada noocan ah aan si waara loo xallin, waxa ay dib u soo laba kacleyn karaan marka la dib loo bilaabo doorashooyinka golayaasha ee degmooyinka dhiman.

Is-casilaadda Hoggaanka TPEC

Guusha doorashada golayaasha degaanka waxa ku timid caqabad weyn/dib-u-dhac 2-dii Janaayo 2022 markii Guuleed Saalax Barre uu soo gudbiyay warqad uu isaga casilayo xilka guddoomiyaha TPEC—yo weliba xubinnimada guddiga—isaga oo sheegay in uusan sii wadi doonin dowrkiisa sababo la xiriira caqabado sii kordhaya. Is-casilaaddiisa waxaa ku xigtey guddoomiye-ku-xigeenkii TPEC, Jaamac Xirsi Faarax, oo isaguna xilka iska casilay, taas oo dareen weyn gelisay shacabka, ururrada bulshada rayidka iyo deeq-bixiyayaasha. In kasta oo TPEC ay soo saartay bayaan ay ku caddaynayso in hannaanku sii socon doono hakad la'aan, isla markaana uu hoggaaminayo ku-sime guddoomiye iyo guddoomiye ku-xigeen, haddana kalsoonida shacabku waxay gashay mugdi. Dhibaatadu waxay sii korortay markii mid ka mid ah xubnaha joogtada ah ee guddiga loo doortay xubin federaal, sidaas darteedna uu ku qasbanaaday in uu ka baxo TPEC. Intaa ka dib, 31-kii Maarso, madaxweynuhu xubin ayuu u magacaabay mid ka mid ah saddexda jago ee ka bannaan TPEC, iyada oo guddoomiyaha baarlamaanka la filayo inuu soo magacaaboo labada xubnood ee dhiman, in kasta oo ay weli taagan tahay. Dib u dhacan ku yimid magacaabista xubnaha guddiga ayaa wiiqday kalsoonida, gaar ahaan beesha caalamka, waxayna hoos u dhac ku keentay hawlihi guddiga.

Hammiga Madaxweyne-nimo ee Deni

Dadaalka uu Siciid Cabdullaahi Deni u galay tartanka doorashada madaxweynaha federaalka waxa uu horseeday in diiradda la saaro maareynta doorashada Aqalka Sare iyo Aqalka Hoose ee Puntland halkii la sii horumarin lahaa hannaanka doorashada golayaasha degaanka. Maaddaama ay dhamaatay doorashadii Madaxweynaha DFS, isla markaana Madaxweynihii hore ee Xasan Sheekh Maxamuud mar kale loo doortay xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, waxa la filayaa in Madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni uu dib u soo laabto, taas oo fursad cusub u noqoneysa in dib loo bilaabo hannaanka doorashada golayaasha degaanka. Si kastaba ha ahaatee, maqnaanshihiisa waxa uu sababay in khilaaf xooggan ka dhex aloosmo xukuumadda fulinta ee Puntland, taas oo u baahan in wax laga qabto, si loo soo celiyo kalsoonida dadku ku qabo hannaanka.

Caqabadaha Waaweyn ee Hortaagan Dimuqraaddiyeynta

In kasta oo ay muhiim tahay in wax laga qabto arrimaha jira wejiga hore ee hannaanka doorashada, haddana waxa jira caqabado kale oo badan oo ay tahay in laga gudbo si loogu guulaysto dhamaystirka doorashooyinka dawladaha hoose ee degmooyinka harsan iyo hore u socodsiiinta dimuqraadiyeynta Puntland guud ahaan. Arrintan waxa ay lagama maarmaan u tahay hanashada kalsoonida dadku ku qabo hannaanka, hoos u dhigista khataraha la xiriira isku dhacayada iyo sare u qaadista hannaanka dimuqraadiyadeed.

Ka-gudubka Caqabadaha Miisaaniyadda

Bilowgii hore-ba, guddoomiyihii hore ee TPEC waxa uu ka cawday in dawladdu taageero dhaqaale ku bixin hannaanka. In kasta oo miisaaniyadda wax looga qoondeeyay TPEC iyo horumarinta hannaanka dimuqraadiyaynta, sanadkii 2021, sida uu sheegay guddoomiyihii hore ee TPEC, miisaaniyadda loo qoondeeyey waxa ka soo gaaray oo keliya 16%. Jiritaan la'aanta taageero dhaqaale keliya ma xaddidayso hawlaha TPEC, balse waxa ay astaan u tahay ka go'naanshaha dawladda dhanka hirgelinta hannaanka, taas oo iyaduna hoos u dhigaysa fursadaha helitaanka taageerada deeq-bixiyayaasha.

Dhismaha Nidaam Wax-ku-ool ah ee Garsoor iyo Xallin Khilaafaad

TPEC waxa ay u bareertay halista ah inay dardargeliso hannaanka iyada oo ayan jirin maxkamad dastuuri ah, lagana soo qaadayo in Maxkamadda Sare ay buuxin karto dowrkan illaa inta laga dhisayo maxkamadda dastuuriga ah. Muddada xilka ee Maxkamadda Sare ayaa iyaduna dhamaatay 15-kii Agosto 2021, taas oo horseedday khaawi sharci iyo garsoor, lana xalliyey 31-kii Maارso 2022 markii Madaxweyne Deni, cadaadis badan ka dib, uu Maxkamadda Sare u magacaabay guddoomiye iyo ku-xigeen cusub. Dhab ahaan, muddadii dheereyd ee golayaasha degaanku aanay fadhiisan, ma jirin hay'ad sharci oo xukuumadda iyo golaha shacabka kala xisaabtanta hannaanka.

Arrintu si kastaba ha ahaatee, illaa iyo hadda ma jirto maxkamad dastuuri ah. Arrintan waxa ay leedahay ahmiyad gaar ah marka la eego xaqiqada ah in ku dhawaaqistii Madaxweyne Deni ku dhawaaqay inuu yahay musharrax u taagan xilka madaxtinimo ee dawladda federaalku ay dhalisay in isaga iyo madaxweyne ku xigeenku ku murmaan waajibaadka ay kala leeyihiin. Xiisadaha noocan ah ee ka dhex aloosma hay'adda fulinta ee Puntland waxa ay caqabad ku noqon karaan horey u socodsiinta hannaanka, gaar ahaan haddii aysan jirin maxkamad dastuuri ah oo xallisa khilaafaadka ku lug leh siyaasadda ama doorashooyinka.

Soohdimeynta Xuduudaha Degmooyinka

Caqabadda ugu weyn ee jirta waxa ay tahay muujinta soohdimaha maamul iyo doorasho ee degmooyinka (administrative and electoral district boundaries). Sida loo kala qeexo xuduudahan waxa ay saameyn weyn ku yeelan kartaa doorashada iyo natiijooyinka ka soo baxa, taas oo keeni karta isku-dhac haddii loo arko in loo xaglinayo bulshooyin ama kooxo siyaasadeed gaar ah. Soohdimeynta xuduudaha waxa kale oo ku biiri kara arrimo kale sida khilaafaad la xiriira dhulka iyo kooxo kala sheegta degaannada qaar. Arrintan waxa laga hadlay muddadii ay socoto doorashada hordhaca ah, isaga oo guddoomiyihii hore ee TPEC uu shaaca ka qaaday in dacwooyin ku saaban soohdimo ay guddiga ka soo gaareen qaar ka mid ah bulshooyinka ku nool degaanno ku dhow Qardho iyo Uffeyn muddadii ay doorashadu socotay. Arrintan waxay tilmaamaysaa in cabashooyin badan ay soo bixi karaan marka la gaaro doorashada golayaasha degaanka ee Puntland oo dhan. Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxa ay hadda soo gaba-gabeysay daraasad ku saabsan soohdimeynta degmooyinka, taas oo marka ay golaha wasiirrada iyo baarlamaanku ansixiyaan saldhig u noqon doonta degaan-doorashada. Dhanka kale, haddii hannaanku noqon waayo mid ku dhisan wada-tashi, ama lagu saleyn waayo rabitaanka bulshooyinka ee heer degaan, waxa uu sababi karaa colaad saamayn ku yeelata doorashada.

Xoojinta Ka qaybgalka Dadweynaha iyo Waxbarashada Codbixiyayaasha

Si kor loogu qaado kalsoonida lagu qabo hannaanka dimuqraadiyeynta waa in la kordhiyo ka qayb-galka dadweynaha. Tani waxay ku lug leedahay laba qaybood oo muhiim ah. Marka hore, waxa lagama maarmaan ah in xisbiyada/ururrada siyaasaddu si fican ugu xiran yihiin degaamada. Marka la eego Puntland, baadi-goobka nidaam cusub ee maamul ayaa keenay in la sameeyo ururro siyaasadeed. Ra'yi ururin ay samaysay Xarunta Horumarinta & Cilmi-baarista Puntland (PDRC) ayaa muujinaysa in muwaadiniintu aysan xiriir muuqda la lahayn ururradan, isla markaana aanay ka warqabin hawlahooda. Daraasaddu waxa ay tilmaamaysaa in muwaaddiniintu aysan kala garaneyn farqiga u dhixeyya barnaamijyada iyo qorshayaasha ururrada siyaasadda, iyaga oo inta badan ururrada ku aqoonsada shakhsiyadka madaxda u ah.

Tan labaad, maalintii cod-bixinta saddexda degmo waxa aad u muuqday heerka akhris/qoraal la'aan ee codbixiyayaasha. Codbixiyeyaal badan ayaa u baahday in gacan laga siiyo codeynta, kuna dhawaqaan urur siyaasadeedka ay doonayaan inay u codeeyaan, iyada oo uu gacan siinayo wakiil ka socda ururka ay sheegeen inay u codeynayaan. Sidaa darteed, arrintan waxay meesha ka saartay shuruud muhiim u ah doorasho xor iyo xalaal ah: sirta doorashada. Wuxuu sidoo kale ahmiyad weyn leh in degmooyinka haray laga hirgesho waxbarashada cod-bixiyayaasha oo dhammaystiran si sare loogu qaado awoodda cod-bixiyuhu ku aqoonsan karo urur-siyaasadeedka uu doonayo inuu u codeeyo.

Caqabadaha Saameynta ku Leh Tirada Codbixiyayaasha

Caqabadda kale ee u baahan in wax laga qabto waxa ay tahay codbixiyayaasha tirada yar ee lagu arkay doorashooyinkii hordhaca ahaa ee saddexda degmo:

- Eyl waxaa iska diiwaangashay 11,470 codbixiye, kuwaas oo 8,671 ka mid ah ay qaateen kaararka codeynta, 6,755 ay codkooda dhiibteen maalintii doorashada. Tani waxa ay u dhigantaa maqnaansho dhan 41%.
- Qardho, 25,405 ayaa iska diiwaangashay, 20,620 ayaa qaatay kaararka codeynta, waxaana codeeyay 16,722, taas oo u dhiganta maqnaansho dhan 34%.
- Degaanka Uffeyn, 9,964 ayaa iska diiwaangashay, 8,287 ayaa qaatay kaararka codeynta, waxaana codeeyay 5,366 qof. Tani waxay la mid tahay maqnaansho dhan 46%, waana saamiga maqnaansho ee ugu sarreeya saddexda degmo.

Intaa waxa dheer, dad badan oo codeyn kara ayaan saddexda degmo iska diiwaangelin, taas oo kordhisay tirada dadka aan codayn.

Sababaha ugu waaweyn ee ay u yar tahay dadka u soo baxay inay codeeyaan waxaa ka mid ah: 1) abaar – codbixiyayaasha intooda badan waxa ay ahaayeen xoolo-dhaqato u guura hadba halka roobku ka da'o, taas oo macnaheedu yahay qaar badan inay xoolahoodii u rareen meelo ka durugsan degmooyinka ay markii hore iska diiwaan-gasheen; 2) koobnaan ololaha waxbarashada madaniga ah, 3) shaki laga qabo in doorashadu dhici doonto maaddama ay marar hore dhicisowday; iyo 4) wakhtiga loogu talagalay qaybinta kaararka oo koobnaa - siddeed maalmood oo kaliya ayaa loo qorsheeyay hawshaas, iyada oo qaybinta kaararka lagu koobay tuulooyinka ay ku yaalaan goobaha codbixintu, taas oo u suuragelin weyday dad badan inay kaararkooda qaataan.

Talooyinka Qoraal-Siyaasadeedka

Doorashadii OPOV ee 25kii Oktoobar 2021 ee Eyl, Qardho iyo Uffeyn waxa ay ahayd guul weyn oo ay gaartay Puntland, si weyn ayuuna dadweynuhu u taageeray. In kasta oo rabitaan weyn loo qabo in la ballaariyo, maamulka dimuqraaddigana la wada gaarsiyo Puntland oo idil, haddana caqabado badan ayaa hortaagan yoolkan. Talooyinka siyaasadeed ee soo socda waxa loogu talagalay inay wax ka taraan maareynta arrimaha muhiimka ah ee lagu sharxay warbixintan.

Dawladda Puntland

- In ay mudnaanta siiyo xallinta khilaafka Eyl ee ku saabsan fadhiisinta golaha, iyada oo qaybaha kale ee ay khusayso - sida bulshada rayidka ah ee Puntland – ugu yeereysa inay qaataan hadba dowlkii looga baahdo.
- Inay hoggaanka sharci-dejinta kala shaqeysyo dib-u-habeynta TPEC iyo hubinta in si cad loo dardar-gesho hannaanka.
- Iyada oo lala kaashanayo bulshada rayidka ah, in wada-tashiyo baahsan laga sameeyo soohdimaha degmooyinka. Tani waxay xaddidi doontaa isku-dhacyada suuragalka ah ee dhici kara, waxayna u sah-leysaa TPEC inay sii waddo doorashada degmooyinka. Sidoo kale, dawladdu waa in ay kaalin mug leh ka qaadato xallinta khilaafaadka ka dhasha soohdimaha.
- In saddexdii gole ee la doortay saami laga siiyo miisaaniyadda dimuqraadiyeeynta, si loo wanaajiyoo bixinta adeegga, xoojinta dhaqaalaha iyo kaabayaasha. Tallaabandan waxay sababi doontaa in degmooyinka kale ay u riyaqaan hannaanka.
- In la fasaxo taageerada miisaaniyadeed ee ay dawladdu u qoondaysay TPEC iyo ururrada siyaasadda si ay u xoojiyaan hawlahooda degmooyinka dhiman.
- In dawladdu muujiyo sida ay uga go'an tahay hannaanka, iyada oo si joogto ah ula shaqaynaysa daneeyayaasha iyo dadweynaha, oo ay ku jiraan warbixinno joogto ah iyo bayaanno caddaynaya jad-walka qorshaha iyo tallaabooyinka xiga.

Bulshada Rayidka ee Puntland

- In ay taageeraan wada-tashiyada ay bulshadu hormuudka ka tahay ee Boosaaso, iyo weliba wada-tashiyada siyaasadeed ee heer sare ah oo ka socda gudaha Puntland, si wax looga qabto xiisadaha soo jireenka ah ee keeni kara in ay wiqaan hirgelinta doorashada.
- In ay dowl muuqda ka qaataan, iyada oo kaashaneysa dawladda, baahinta waxbarashada codbixi-yayaasha, iyada oo diiradda la saarayo wanaajinta fahamka iyo kalsoonida dadku ku qabo hannaanka doorashada iyo isku-xirka ururrada siyaasadda iyo muwaadiniinta, gaar ahaan reer miyiga, bulshooyinka ku nool degaannada xeebaha iyo reer guuraaga.
- In ay tababbaro siiyan golayaasha cusub ee la soo doortay, iyo tababbaro gaar-gaar ah oo ka tur-jumaya mudnaanta iyo baahiyaha degmada. Tababbarradan waa in si taxadir leh loo agaasimo, si kor loogu qaado awoodda waxqabad iyo aqoonta xildhibaannada, loogana fogaado is bar-baryaac (si habsami leh loo qorsheeyo).

TPEC

- In doorashooyinka degmooyinka haray loo sameeyo qorshe cad iyo wakhti sugan.
- In ururrada siyaasadda laga taageero fududaynta calaamadahooda, si loogu sahlo codbixiyayaasha inay kala aqoonsan karaan ururrada
- Iyada oo la habeynayo wakhtiga iyo qaabka loo qabanayo, in la hubiyo in hawlahaa diiwaangelinta codbixiyayaasha iyo qabanqaabada codbixintuba xisaabta ku daraan baahiyaha gaarka ah ee bulshada reer guuraaga xoolo-dhaqatada ah xilligan abaaruuhu jiraan.
- In laga fakaro kordhintaa wakhtiga ay codbixiyeyaashu ku qaadan karaan kaararka codbixinta doorashooyinka degaanka ee soo socda.

Jilayaasha Caalamiga

- Inay joogteeyaan taageerista hannaanka, iyaga oo garawsanaya ahmiyadda ay leedahay in la joogteeyo xawliga hawsha iyo wax ka qabashada arrimaha muhiimka ah ee mudnaanta leh, sida fadhiisinta golaha degaanka ee Eyl.
- Inay daneeyayaasha Puntland ka taageeraan meel marinta taloooyinka kor ku xusan.
- Fulinta dadaallo si wanaagsan loo agaasimay oo joogto ah oo lagu taageerayo kobaca ururrada siyaasadda, gaar ahaan dhinacyada muhiimka ah ee dhaqaalaha, is-gaarsiinta iyo muuqashada.
- Inay saddexda gole ee la doortay ku taageeraan dhagaale lagu xoojinayo awooddada waxqabad iyo kaabayaasha.